

Halbeegyada Guud ee Ku Laabshada Waxbarida Fool-ka-foolka ah Iyadoo Loo Marayo Qaabka Wax Ku Barida Goobta ama Isku Dhafan Werinta 10/28/202

Si dugsigu si buuxda ugu noqdo waxbarida fool-ka-foolka ah iyadoo loo marayo qaababka wax ku barida Goobta ama Isku Dhafan ee ODE, shuruudaha hoose waa in la buuxiyo, oo uu ku jiro jadwalka halbeegyada ee soo socda:

Haddii dugsigu soo jiito >10% ardayda ama >10% shaqaalaha degmo ay heerarka kiiseed ama ka helitaanada cudurka gelinayo sheexada “Kala-guurka” (eeg jadwalka hoose ee halbeegyada) waa inay tixgeliyaan dib ugu laabashada qaababka wax ku barida fool-ka-fool ilaa degmooyinkaan sidoo kale ka buuxiyaan halbeegyada la isaga baahan yahay, haddii uusan kadib wadahadalka lala yeesho hay’adda caafimaadka bulshada ee deegaanka go’aan wadajir ah lagu gaarin in faafinta bulsheed ee degmada deriska ah aysan keeneynin halis aad u sareysa.

Halbeegyada & Qaababka	Goobta	Goobta iyo Aqoon-dirsiga	Isbeddelka	Aqoon-dirsiga
Heerka Kiisaska Degmada 100,000 Qofba 14 maalmood Gudahooda	<50.0	50.0 ilaa <100.0	100.0 ilaa ≤200.0	>200.0
Tirada Kiisaska Degmada 14 maalmood Gudahooda (degmooyinka yaryar¹)	<30	30 ilaa <45	45 ilaa ≤60	>60
Ka Helida Cudurka Degmada²	<5.0%	5.0% ilaa <8.0%	8.0% ilaa ≤10.0%	>10.0%
Qaabka Waxbarida	Sii mudnaan qaababka wax ku barida Goobta ama Isku Dhafan (haddii loo baahdo si loo joogteeyo kooxaha yaryar).	Sii mudnaanta marxaladaynta taxaddarka leh ee wax ku barida Goobta ama isku Dhafan ee dugsiyada hoose (laga bilaabo K-3 iyo marka lagu daro fasalo dheeraad ah ilaa fasalka 6). Dugsiga dhexe iyo dugsiga sare ugu horrayn Nidaamka Aqoon-dirsiga ee Dhammeystiran ee leh Waxbarida Fool-ka-foolka ah ee la oggolaan karo. Waqti kadib, haddii dugsiyada hoose ay muujin karaan awoodda lagu xaddidayo is-qaadsiinta cudurka ee deegaanka dugsiga ⁴ , u gudub wax ku barida Goobta ama Isku-dhafan.	Tixgeli u gudubka Nidaamka Aqoon-dirsiga ee Dhammeystiran ee leh Waxbarida Fool-ka-foolka ah ee la oggolaan karo. Degmooyinka leh kiisaska/ka helitaanka cudur ee kordhaya (ee ku jiraan qeybta halista hooseysa), saraakiisha dugsiyeed waa inay kala hadlaan maamulka caafimaadka bulshada ee deegaanka (LPHA) waana inay tixgeliyaan fiditaanka COVID-19 ee gudaha dugsiyada iyo bulshada deegaanka si loo go'aansado in lagu laabto Nidaamka Aqoon-dirsiga ee Dhammeystiran (CDL). ³ Dugsiyada ku yaala degmooyinka leh kiisaska/ka helitaanka cudur ee hooseeya waa inay ku nagaadaan CDL ilaa ay hoos ugu dhacaan qeybta Halista Dhexdhexaadka ama ka hooseysa.	Hirgeli Nidaamka Aqoon-dirsiga ee Dhammeystiran ee leh kaliya Waxbarida Fool-ka-foolka ah ee la oggolaan karo.

1. Degmooyinka ay deggan yihiin <30,000.
2. Haddii tirada baaritaanka ee gobolka oo dhan ay hoos u dhacdo in ka badan 10% isbuuca marka la barbardhigo isbuucii hore arrimo dibbada ah awood (sida iyadoo ugu wacan tahay masiibo dabiici ah ama hoos u dhac daran ku yimaado tas'hiilaadka baaritaanka), markaa ODE waxay u tixgelin doonaan si kumeelgaar ah inay u hakiyaan isticmaalka bogoleyda togan marka la sameynayo tixgelinada dib-u-furitaanka.
3. Iyadoo la tixgelinayo faafinta bulsheed, waaxda caafimaadka bulshada waa inay tixgelisaa kiisaska ka jira bulshada, helitaanka baaritaanka COVID-19 ee dhawaanahan, awoodda bulshada si ay uga jawaabaan kiisaska iyo dillaaca cudurka iyo mugga isbitaalka gobolka ee ay heli karaan dadka qaba cudurka daran.
4. Qiyaas ahaan si loola socdo horudhaca xaddidan ama faafitaanka, waaxda caafimaadka bulshada ee deegaanka waa inay eegtaa tirada dillaaca cudurka celcelis ahaan 3 ah ama ka yar, marka laga reebo dillaacyada cudur ee kaliya halka kiis ah, 4-tii toddobaad ee ka horreeyey.

Kaalmada Gobolka oo dhan ee Tilmaamaha Fool-kafoolka ah ee Xaddidan (LIPI) ee kooxaha ardayda ee gaarka ah ee

ODE [Hagista Nidaamka Aqoon-dirsiga](#) waxay bixisaa [Waxbarida Fool-ka-foolka ah ee Xaddidan](#)(LIPI) si loo daboolo baahiyaha kooxaha gaarka ah ee ardayda iyadoo lagu saleynayo baahida loo baahan yahay ee waxbarashada, xiriirka, bulshada-shucuurta, manhajka, waxbarida, iyo/ama taageerida qiimeynta. Tani waxaa ka mid ah, balse kuma xaddidna, qodobbada lagu taageerayo ardayda ay la soo gudboonaato naafonimo, barteyaasha luqadda Ingiriisiga, iyo sidoo kale barnaamijyo ay ka mid yihiin barashada xirfadaha farsamada (CTE) oo u baahan kara gacan-ku-heynta xirfadaha iyo bixinta jawi qiimeyn oo sugan. Kaalmadan laguma xirayo shuruudaha waqtiga waxbarida. Ka-reebitaanada buuxinta halbeegyada degmo si loo hirgaliyo LIPI oo xoojinayso [Nidaamka Aqoon-dirsiga](#)waa in mudnaanta la siiyaa iyadoo la raacayo shuruudaha soo socda:

Hubi in tallaabooyinka xooggan ee baaritaan diyaar yihiin laga bilaabo maainta kooraad oo tixraac [Qorsheynta Dulucyada COVID-19 ee ku jira Qalabka Iswata ee Dugsiyada](#)ee kiisaska togan, shaqsiyaaka calaamadaha leh, iyo u-baylah noqoshada.

Si buuxda ugu hoggaansan qeybaha 1-3 ee Dugsiyada Diyaargarka ah, Hagista Barteyaasha Nabdoon.

Si buuxda ugu hoggaansan Hagista Nidaamka Aqoon-dirista ee [Waxbarida Fool-ka-foolka ah ee Xaddidan](#)(LIPI), taas oo ay ku jiraan xaddidaadyo dheeraad ah oo ku saabsan tirada kooxaha, waqtiga, iyo in ka badan.

Ka-reebitaanada Gobolka oo Dhan: Dugsiyada Yaryar Fog

Dugsiyada dawliga ah iyo ama gaarka loo leeyahay ee yaryar ee fog ee ay ka diiwaan gashan yihiin ≤ 75 wadar dhan kuwaasoo ku yaala degmo aan buuxinin Halbeegyada Guud (Qeybta 0b) ayaa tixgelin karaan u furnaanshaha waxbarida fool-ka-foolka ah (On-Site ama Hybrid) keliya marka iyo haddii LPHA ay ogaato shuruudaha soo socda in la buuxiyay:

Dugsiyada wuxuu ku dadaalayaa bilaw ka maran COVID-19. Hubso in tallaabooyinka baaritaan oo adag ay diyaar yihiin laga bilaabo maalinta kooraad oo tixraac [Qorsheynta Dulucyada COVID-19 ee ku jira Qalabka Iswata Dugsiyada](#) wixii kiisaska togan ah, shakhsiyaadka astaamaha leh, iyo u-baylah noqoshada.

Dugsiyada haddii ay dhigtaan wadar dhan ≤ 75 uuna ku yaalo degmo aan buuxinin Halbeegyada Guud (Qeybta 0b).

Dugsiyada hadduu in ka badan 25 mayl u jiro jidka ugu dhow ee lagu safro laga bilaabo magaalo kasta oo ay ku nool yihiin dad ka badan 3,000 oo qof.


Kama dhex jirto faafin bulsheed bulshooyinka ka adeegga xarumaha shaqaaleysiinta iyo xarumaha bulsheed ee aasaasiga ah (wixii dukaameysi iyo adeegyada kale fool-ka-foolka ah) oo dugsiyada wuxuu ka fog yahay masafo aad u ballaaran bulshooyinka laga soo sheegay faafinta bulsheed ee COVID-19 labadii toddobaad ee la soo dhaafay.

Kama dhex jirto faafin bulsheed aagga dugsiyada ee la isugu imaado (meelaha ay ku nool yihiin ardayda dhigata).

Iyadoo la tixgelinayo faafinta bulsheed, waaxda caafimaadka bulshada waa inay tixgeliyaa kiisaska ka jira bulshada, helitaanka baaritaanka COVID-19, baaritaanada togan ee dhawaanahan, awoodda bulshada si ay uga jawaabaan kiisaska iyo dillaaca cudurka iyo mugga isbitaalada gobolka ee ay heli karaan dadka qaba cudurka daran.

Dugsiyadu waa inay tixgeliyaan inay joojinayaan Waxbarida Fool-ka-foolka ah ee Xaddidan marka heerarka kiiseed ee degmadu ay ka sarreeyaan 200 kiis 100,000 qofba ee degmooyinka ay ku nool yihiin dad badan $> 30,000$ (ama in ka badan > 60 kiis oo degmooyin ay deggan yihiin $< 30,000$). Marka la tixgelinayo in la xiro dugsiyada dugsiyada ku furmay iyadoo raacayo mid ka mid ah ka-reebitaanada Halbeegyada Guud (0b) ee dib loogu furayo dugsiyada si loo sameeyo waxbarid fool-ka-fool ah, oo ay ka mid tahay ka-reebitaanada LIPI:

Dugsiyadu waa inay la shaqeyaan LPHAs si ay uga fiirsadaan ku faafitaanka COVID-19 dugsiyada dhexdooda iyo bulshada guud marka la go'aaminayo ku-laabashada kumeelgaar ah ee [Nidaamka Aqoon-dirsiga ee Dhammeystiran](#). Haddii ay ka jiraan kiisas laba kooxood ama ka badan iyadoo aan la aqoonsan qaadsiyaha guud, saraakiisha dugsiyada waa inay kala hadlaan LPHAs si loo go'aamiyo in tani ay ka dhigan tahay faafitaan aan la garanaynin oo ka dhex jirto dugsiyada ama bulshada guud. Waxaa lagu dhiirrigelinayaa in dugsiyada raaco talooyinka ka socda LPHA ee in u gudubka kumeelgaarka ah ee waxbarida fool-ka-foolka ah (laba toddobaad ama ka badan) lagu talinayo si loo ilaaliyo caafimaadka iyo badqabka ardayda, shaqaalaha, qoysaska iyo bulshada guud.



Ka-reebitaanka Degmada Dadweynuhu Ku Yar Yihiin, Degmada Dadweynuhu Ku Badan Yihiin

Kaalmada ku-laabashada waxbarida fool-ka-foolka ah waxay dhici kartaa marka ay jiraan xaaladaha soo socda:

Wadarta heerka kiis ee degmada ee COVID-19 gudaha 14 maalmood waa < 100.0 100,000 qofba ee dadweynaha ka tirsan

Dugsiyadu waxay si buuxda ugu hoggaansamaan qeybaha 1-3 ee Dugsiyada Diyaargarka ah, Hagista Barteyaasha Nabdoon, ardayduna kama mid noqon karaan hal koox, ama koox badan oo dhan > 50.0 qof.

Kama jirto faain bulsheed aagga dugsiga ee lagu nool yahay. Iyadoo la tixgelinayo faafinta bulsheed, waaxda caafimaadka bulshada waa inay tixgelisaa kiisaska ka jira bulshada, helitaanka baaritaanka COVID-19 ee bulshada, bulshada, helitaanka baaritaanka COVID-19, baaritaanada togan ee dhawaanahan, awoodda bulshada si ay uga jawaabaan kiisaska iyo dillaaca cudurka iyo mugga isbitaalada gobolka ee ay heli karaan dadka qaba cudurka daran.

Kama dhex jirto faafin bulsheed bulshooyinka ka adeegga xarumaha shaqaaleysiinta iyo xarumaha bulsheed ee aasaasiga ah (wixii dukaameysi iyo adeegyada kale fool-ka-folka ah) oo dugsigu wuxuu ka fog yahay masaafu aad u ballaaran bulshooyinka laga soo sheegay faafinta bulsheed ee COVID-19 labadii toddobaad ee la soo dhaafay. Dugsigu uma adeego tiro badan oo ardayda la soo beddelo oo ku nool meel ka baxsan aagagga la deggan yahay ee ka imanaya bulshooyinka laga soo sheegay faafinta busheed ee COVID-19 saddexdii toddobaad ee la soo dhaafay.

Sida lagu sheegay qeybta 0c, marka degmadu gaarto sheexada "Aqoon-dirsiga" xaaladooda imminka waxay ku jirtaa halis sare oo dhammaan dugsiyada ku yaalo degmada waxaa looga baahan yahay inay isla markiiba u guuraan Nidaamka Aqoon-dirsiga ee Dhammeystiran, oo ay ku jirto mida hoos timaada ka-reebitaankan.



Ka-reebitaanka Gobolka oo Dhan: Ka-dhaafida Degdega ah ee Waxbarida Fool-ka-foolka ah ee Dugsiyada ay saameeyeen Dab-duureedyada

Si uu ka-dhaafitaankan u bixiyo Waxbarida Fool-ka-foolka ee Degdega ah ee dugsiyada u adeegaya bulshooyinka ay saameeyeen dab-duureedyada waxaa kaabayo hagaha Dugsiyada Diyaarka ah, Barteyaasha Nabdoon, ee Waaxda Waxbarashada 2020-21. Fadlan u dir ODECOVID19@ode.state.or.us wixii su'aalo ah. Hagistan waxaa la sii daayay markay ahayd 10-5-20. Waa ku simid oo waxay ku xiran tahay isbeddel dheeraad ah.

Sababaha Waxbarida Fool-ka-foolka ee Degdega ah ee Bulshooyinka ay Saameeyeen Dab-duureedyada

Arday iyo qoysas badan oo ka tirsan bulshooyinka ay saameeyeen dab-duureedyada ayaa weli ka barakacsan aagagga daad-gureynta ee shaqeynaya, gelitaan la'aanta guryahooda, ama waxay arkeen guryaha oo basbeelay iyo kaabeyaasha dhaqaale oo ka dhigay helitaanka Nidaamka Aqoon-dirsiga mid macquulgal aan ahayn. Intaas waxaa sii dheer, dugsiyada qaar ee u adeegga bulshada ay saameeyeen dab-duureedyada ee ku nool Oregon waxay la kulmayaan khasaaro ballaaran oo baahsan oo ku xirnaanta internetka ah, aaladaha tikniyoolajiyada, iyo goobo aamaan ah oo taageero leh si ay uga qeybqaataan Nidaamka Aqoon-dirsiga ee onlaynka ah.

Arday iyo qoysas badan ayaa sidoo kale la kulmay qarracan weyn saameynta dab-duureedka awgiis. Qarracankan iyo baahida loo qabo taageerada bulsheed, shucuureed iyo caafimaadka maskaxeed ayaa ah qodobka hagaya ka-dhaafida degdega ah si loogu oggolaado waxbarida fool-ka-foolka ah. Dugsiyadu waxay u adeegi karaan xarunta taageerada ee ardayda iyo qoysaska ee laga yaabo inay la kulmantay saameynta waarta ee qarracanka (eeg maqaalka EdSource ee ku saabsan saameynta waarta ee qarracanka dab-duureedyada California). Ardaydu waxay ka heli karaan taageerada ay u baahan yihiin la-taliyayaasha, helitaanka takhasusleyaasha caafimaadka dhimirka, iyo xitaa inay arkaan macallimiinta iyo asaagooda ay aqaanaan. Qoysas badan, sida la fahmsan yahay, ayaa diirada saaraan sidii ay u dabooli lahaayeen baahiyaha aasaasiga ah ee maalinlaha ah ee guri iyo cunto kaafin karaan.

Haddii dugsiyada dawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee u-qalma ay isku waafaqaan baahiyaha jira ee ardayda ee bulsheed, shucuureed, caafimaadka maskaxeed, iyo baahiyaha guriyeed iyo nafaqeed ee ardayda ay saameeyeen dab-duureedyada ka dhacay Oregon ayaa ka culeys badan saameynaha xun ee kororka khataraha COVID-19, oo laga yaabo in la yareeyo iyadoo la adeegsanayo tallaabooyin badqab oo dheeraad ah; dugsiyadu waxay ku siin karaan adeegyo fool-ka-fool ah oo leh wax bixino dheeraad ah (eeg hoos). Marka loo eego ardaydaan badankood waxaa la aaminsan yahay in goobta ugu badqabka badan ee bulsheed inay tahay dugsiyada.